


Hambalyo ka timid NORWAY oo ku socota Madaxweynaha Cusub ee Somaliland mudane Ahmed Mohamed Mohamoud Siilaanyo



Ahmed Abdullahi Obsiye

Maanta shacab weynaha Somaliland meel kasta oo ay joogaanba waa maalin farxad iyo guul u ah. Laguma faraxsana oo kaliya doorashada Mudane Siilaanyo loo doortay madaxtinimada Somaliland, waxaa kale oo ay ku faraxsanyihiin dhamman hawlaha iyo jawiga guud ee ku xeeran dhacdadan NAADIR ka ku ah caalamka oo dhan gaar ahaan mandiqaddan aan ku noolnahay. Haddaba aniga oo ka duulaya marxaladan aan ku jirno waxaan rabaa inaan ka hadlo dhawr arrimood:



Md. Ahmed Mohamoud Silaanyo

Oslo

October 25, 2003

1. **Madaxweynaha cusub mudane Ahmed Mohamed Mohamoud Siilaanyo**, Waxaan marka hore u soo gudbinayaa hambalyo iyo duco aan Eebbe uga rajaynayo inuu

xilkan Qran ee loo doortay ku garab-galyo, AAAMIIN. Maxadaxweynihii hore Dahir Rayaale, waxaan ugu hambalyeynayaa doorkiisii wanaagsanaa ee uu ku soo hogaaminayay dalka, gaar ahaan mawqifkii muqadaska haa ee uu ka qaatay doorashadii. Waxaad ahaanaysaa abidkaa madaxweynihii hore oo qadarintiisa iyo qiimihiisa ku leh ummadda reer Somaliland. Mudane Dahir, weldone and thank you. Ummadda reer Somaliland waxaan leeyahay waad wada guuleysateen dhammaantiin iintii dooratay Siilaanyo, Dahir iyo Faysalba. Sidaas darteed waa inaad ku dedaashiin wada-jirkiina iyo walaaltinimada. EEBBE ha inooga dhigo dawladii lagu caano-maalay. Waa inaan dhammaanteen taageernaa xukuumadda cusub ee soo socota oon u rajaynayo guul iyo caddaalad inay inagu hagaan.



Eebbe tubta toosan ha ina waafajiyo.

Eng. Ahmed Abdullahi Obsiye